



Januari 2008

Somali: Afsoomaali

Kani waa xisbiga Centerpartiet

Xisbiga Centerpartiet waxa ay siyaasadiisu ku salaysan tahay sinaanshaha iyo cadaaladda dhamaan dadka. Iyada oo aan loo eegayn jinsiga, diintaada, galmadaada, jinsiyaddaada meesha ay ka soo jeedo ama dhaqaalahaagaba waa in aad awood u hesho in aad gaadho hamigaaga/mawqifkaaga oo aad riyodaada kasban karto.

Waxa aan ahmiyad siinaa:

Shaqadda iyo shirkadfurasho: Iswiidhan waa in ay ahaataa waddamada aduunka ta ugu wanaagsan suurto galinta lagu bilaabo ama loo wado shirkad. Waxa annaga muhiim noo ah in shirkadluhu uu ahaado mid faa'iido hela hawl badana aanay gaadhin. Waxa aan rabnaa in ay dhib yaraato sida dadka loo shaqaaleeyo iyo in dadka shaqaynayaa ay inta badan mushaharkoodu u soo hadho.

deegaanka: Waa in ay suurta gal noqoto in xataa mustaqbalka lagu maydhan karo oo la gali karo haraheena iyo badaheenaba, in lagu neefsado hawo fiican iyo in lagu raaxeysto bay'adda. Isbeddelka cimilada waa in aan la dhayalsan. Xisbiga Ceterpartiet waxa uu rabaa in baabuurta cusub ay ku socoto baatroot beddelkiisa. In cuntada aynu soo saarnaa ay ahaato mid caafimaad leh oo sugan iyo in adeeg la tagi karo adiga oo ilaalinaya deegaanka. Waa in ay ilaalinta deegaanku ahaataa mid dhalisa waxtar.

cusboonaysiinta waxqabadka Bulshada: Centerpartiet waxa uu rabaa in aad adigu go'aamo badan gaadhid oo u saabsan nolol maalmeedkaaga. Waa in ay suurta gal ahaato in aad doorato caafimaadka, iskuulka iyo xanaanada. Qoysku waa in ay iyagu go'aansan karaan nooca xanaanada caruurta ee ay rabaan. Hadii ay tahay in ay doortaan daryeelka caruurta ee dagmadda ama tusaala ahaan ka iskaashatada waalidiinta. Waa in aan ilmana iskuulka dhamayn isaga oo aan waxba akhriyin, xisaabin ama qorin. Dhamaan dadka waaweyn waa in ay iyagu go'aansadaan sida ay u noolaanaayaan iyo waxa ay rabaan in laga caawiyo.

bulshadda furfuran: Iswiidhan waa in ay lahaato aragti furan oo soo dhaweyn leh oo ku wajahan wadamada aduunka. Waxa aan taageernaa furnaanshaha iyo cadaaladda. Taas oo ah ugu yaraan mid ku lid ah cunsuriyadda iyo ajaanib nacaybka. Bulsho uu is dabagalku batay ayaan annagu u dagaalamaynaa xayndaabka shakhsiga

Dawladda

Xisbiga Centerpartiet waa xisbiga saddexaad ee ugu weyn dalka marka la eego doorashadii 17 september 2006 ka dhacday dalka Iswiidhan. waxa aan wadajir dawladda ula dhisnay xisbiyada

Moderaterna, Folkpartiet iyo Krisdemokraterna, iyada oo afar wasiir ay ka soo jeedaan xisbiga centerpartiet.

Maud Olofsson waa hogaamiyaha xisbiga. Waxa kale oo ay tahay wasiirka wax-soo-saarka iyo raysal wasaare ku xigeen.

Åsa Torstensson waa wasiirka isgaadhsiinta.

Eskil Erlandsson waa wasiirka beeralayda.

Andreas Carlgren waa wasiirka deegaanka.

Centerpartiet iyo EU-da

Xisbiga Centerpartiet riyodiisa ku saabsan midowga yurub(EU) waa ” EU dhuuban hase yeeshee ka af badan”. EU ahmiyad saarta shaqadeeda guud, taas oo ah in la sugo nabadda, in lala dagaalamo dambiilayaasha caalamka iyo in laga shaqeeyo deegaan ka wanaagsan.

Lena Ek waa xildhibaanka Centerpartiet u jooga EU-da. Waxa ay si joogto ah u fadhidaa golaha warshadaha, cilmi-baadhista iyo Tamarta Laydhka. Waxa ay hogaamisaa kooxda-ALDE ee parlamaanka yurub qaybtiisa ku meel gaadhka ah ee isbadelka cimilada.

Sii akhri:

www.centerpartiet.se
www.sweden.gov.se
www.lenaek.se